

WASAARADDA WAXBARASHADA HIDDAHA  
IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD. 2024

AF-SOOMAALI



XAFIISKA IMTIXAANKA IYO SHAHAADADA PUNTLAND





**WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE  
XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND**

**SOM EXAMS**

Magaca Ardayga			
R/Lambar			
Magaca Dugsiga			
Gobalka:		Degmada:	

**IMTIXAANKA FASALKA 12AAD, XXXXXXXXXX  
AMIN: 2 SAAC IYO 10 DAQIIQO AKHRIS AH**

# AF-SOOMAALI

**Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay:**

- Waxaa imtixaanku ka kooban yahay 11 bog
- Tiri bogagga, hadday wax ka maqan yihiin u sheeg ilaaliyaha imtixaanka
- Hubi inad ku qortay magacaaga iyo Roll lambarkaaga Imtixaanka
- Lama ogola waraaqo dheeraad ah
- Jawaabtu hadday kaa qaldanto isku tallaab saar, kadibna qor tan saxda ah.

**Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay:**

QAYBTA	DHIBCAHA
Cutubka 1aad: Afka Iyo Qoraalka	13 Dhibcood
Cutubka 2aad: Gorfayn Iyo Guurti	17 Dhibcood
Cutubka 3aad: Doodaha Iyo Fagaare Ka Hadalka	13 Dhibcood
Cutubka 4aad: Waayaha Haldoorka	12 Dhibcood
Cutubka 5aad: Maadays	10 Dhibcood
Cutubka 6aad: Akhriska Iyo Kobcinta Garaadka	14 Dhibcood
Cutubka 7aad: Sahanka Iyo Aqoon Baarista	21 Dhibcood
<b>Wadar</b>	<b>100 Dhibcood</b>

**Waxaa iska leh saxaha**

QAYBAHA	DHIBCO
Cutubka 1aad:	
Cutubka 2aad:	
Cutubka 3aad:	
Cutubka 4aad:	
Cutubka 5aad:	
Cutubka 6aad:	
Cutubka 7aad:	
<b>Wadar:</b>	



Boggan waxaad u isticmaashaa feegaar ahaan. Lamana sixidoono.

A series of horizontal dotted lines for writing, with a small black mark in the middle of the page.



## CUTUBKA 1AAD: AFKA & QORAALKA (13 DHIBCOOD)

### SHEEKO (10 DHIBCOOD)

Shimbirka guuguuluhu waxa uu ka mid yahay shinbiraha ku dhaqan geyigeenna. Waxa uu leeyahay dhoor iyo fuq dheer. Waa shinbir aad u qurux badan oo guurguura isaga oo raadinaya hadba cimilada ku habboon, waa shimbir dheereeya oo isaga gudba qaarad ilaa qaarad.



Markii uu guur doon yahay waxa uu hawl dheer u maraa sidii uu u heli lahaa oori ku habboon oo ku qanacda in ay nolol wada alkumaan. Marka ay ku qanacdo in ay marantidiisa noqoto, afka ayuu ugu soo qaadaa caleen ama quud kale, haddii ay raali ka tahay guurkiisa way gasiimanaysaa, wuxuuna geeyaa buulkii uu u diyaariyey. Waxa ay dhashaa ooridiisaasa halkii mar shan ama toddoba ugxamood, si wda jir ah ayayna u quudiyaan marka ay dilaacaan.

Guuguuluhu marka uu arko biyo ama cunto, keligiis ma cuno ee wuxuu raadiyaa ooridiisa si ay u wada cunaan ama u wada cabbaan. Haddii uu waayo afadiisa marka uu cabbayo wuu baadi goobayaa ilaa uu soo helo, ka dibna wuu soo kaxaynayaa si ay hal mar u wada cabbaan. Shimbirkani noloshiisa hal mar ayuu guursadaa, haddii ay dhimato ooridiisu waxa uu aad uga ciyaa goobtii ay ku ruuxbeeshay, aad ayuuna ugu soo noqnoqdaa, mana guursado afo danbe.

Afkiisa dheer ayaa u sahla in uu si fudud dhulka uga soo gurto cayayaanka iyo baayihiisa kale. Waxaa uu lee yahay dareen gaar ah oo uu ku ogaan karo halka ay ka dhaw yihiin biyaha dhulka hoostiisa ku jiraa, waana sababta uu Nabbi Sulaymaan nabad gelyo dushiisa ha ahaatee, ugu dirtay sahaminta biyaha. Waxa kale oo uu caan ku yahay runta, waana lagu halqabsadaa run sheegnimadiisa.

Rasuulkeennu naxariis & nabadgelyo dushiisa ha ahaatee: "Wuu Diiday in la dilo Shimbirka guuguulaha".

**B. Ka warceli weydiimahan: (6 dhibcood)**

1. Muxuu sameeyaa guuguuluhu marka ay ku qanacdo in ay oori u noqoto, middii uu guurka ka dalbaday?

.....  
.....?

2. Afada guuguuluhu immisa ugxamood ayay dhashaa halkii mar?

.....  
.....

3. Maxaa u fududeeya guuguulaha in uu cuntadiisa si fudud u gurto?

.....  
.....

4. Muxuu ugu doortay Nabi Sulaymaan in uu guuguluhu biyaha u sahamiyo?

.....  
.....

5. Sheeg magac kale oo loo yaqaan shimbirka Guuguulaha

.....  
.....

6. Muxuu sameeyaa guuguuluhu marka uu biyo soo arko?

.....  
.....

**T. Sharax erayadan: (4 dhibcood)**

1. Gasiin:

.....  
.....

2. Ugxan:

.....  
.....

## 3. Ruuxbeel:

.....

.....

## 4. Buul:

.....

.....

## J. Isku aaddi erayadan iyo macnahooda (3 dhibcood)

(dhambaal- hiigsi- hagrasho)

1. Qof qaban waayey wax uu qaban karo.

\_\_\_\_\_

2. Qoraal ka soo fuley cid oo cid kale ku socda.

\_\_\_\_\_

3. Aragti durugsan oo la rabo in laga gungaaro.

\_\_\_\_\_

## CUTUBKA 2AAD: GORFAYN IYO GUURTI (17 DHIBCOOD)

## B. Isku aaddi erayadan iyo macnahooda (7 dhibcood)

Erayga	Jawaab	Macnihiisa
1. Jees		A. Marka dhirtu soo bixiso caleenta.
2. Ciirsi		B. Dhinaca bidix ee la iska taago geela, marka la lisayo.
3. Magool		C. Qori korka ka fiyow, gudahana bolol ka ah.
4. Dhardhaarro		D. Qof aad nafta kula eeratay.
5. Soddog		E. Reer keligii meel deggan.
6. Xorshosh		F. Saddexda dhagax ee dheriga wax lagu karinayo la kor saaro.
7. Haaneed		G. Lammaanahaaga aabbihii.



**T. Sheeg macnaha loola jeedo sarbeebahan (6 dhibcood)**

1. Fartaa gaarta. (F3. Bogga 63)

.....

.....

2. Isma taago.

.....

.....

3. Caguhuu wax ka deyey. (F3. Bogga 30)

.....

.....

**J. Isku aaddi sarbeebaha iyo macnahooda adiga oo adeegsanaya xarriiq****(4 dhibcood)**

	Sarbeebta	Macnaha
1	Waa dar leef	Biyo ayaa laga dhergey oo dhaan lama aaddo.
2	Waa wadaama qub	Waa la guurey oo reerka waa la raray.
3	Caynkaa hoosta laga geshey	Weligii meel kuma negaan karo.
4	Sal ma leh	Ceelku waa biya yarood.

**CUTUBKA 3AAD: DOODAHA IYO FAGAARE KA HADALKA (13 DHIBCOOD)****B. Ka warceli weydiimahan (4 dhibcood)**

1. Laba ka sheeg kalluunka baddeenna laga helo. (F3. Bogga 74)

.....

.....

2. Qoraalka dooda cuddooni waxa uu ka kooban yahay saddex qaybood. Haddaba laba ka sheeg.

.....

.....

**T. Erayadan mid walba macnihiisa ku aaddi (9 dhibcood)**

(Baroosin, taabbagal, birjeex, ladqabo, laqdabo, magaan, xagmar, sinsaaro, buuni).

1. Wax si rasmi ah u hirgalay. (-----)
2. Mid ka mid ah tabaha legdinta. (-----)
3. Bir weynoo xarig xooggani kaga xiran yahay afka sare oo leh ilko dhulka gelaya, kaas oo lagu joojiyo gaadiidka badda. (F3. Bogga 68) (-----)
4. Cadho ka bi'in ama maslaxaad. (-----)
5. Sirid, wax is daba marin. (-----)
6. Wadaad diinta si fiican u yaqaan. (-----)
7. candhada geela ah oo qaybteed maydhax lagu maro. (-----)
8. Waa geesi dagaalyahan ah. (-----)
9. Faras gaabiya ama neef caana yar. (-----)

**CUTUBKA 4AAD: WAAYAHA HALDOORKA (12 DHIBCOOD)****B. Ka warceli weydiimahan (4 dhibcood)**

1. Dadkee ayaa la oran karaa waa haldoor?

.....

.....



2. Mid ka sheeg dadkii haldoorka ahaa ee aad ku soo baratay fasalka 4aad ee dugsiga sare.
- .....
- .....

### T. Goobo geli xarafka jawaabta saxda ahi ku jirto (6 dhibcood)

1. Haragga caanaha lagu qaato:
 

a. Maqaar	c. Haan
b. Sibraar	d. Doobi
2. Mid maahee inta kale waa xoolo Ilaahay dartii loo qalay:
 

a. Tadcaar	c. Waaqdhaacin
b. Rabbibari	d. Sooryo
3. Ninka biilka u kala fadha sida findhicilka:
 

a. Qalqaali	c. Qorqode
b. Qacqacle	d. qandhuufte
4. Hilibka yaryar ee ku hadha haragga neefka xoolaha:
 

a. Rogob	c. Rucub
b. Ruqur	d. rujub
5. Caanaha isku gaadha candhada:
 

a. Gaag	c. Gabax
b. Gaax	d. Xoor
6. Socodka dhibka iyo lugooyada leh:
 

a. Tafantoof	c. Tafwareen
b. Tafantaac	d. Tallan

### J. Halxidhaale (2 dhibcood)

Waxaad sheegtaa tuulo cagaaran, dhismaheeduna casaan yahay, dadkeeduna uu madow yahay. (F3. Bogga 105)

.....

.....

**CUTUBKA 5AAD: MAADAYS (10 DHIBCOOD)****B. Goobo geli xarafka jawaabta saxda ahi ku jirto (6 dhibcood)**

1. Midabka ay cadceeddu samayso aroortii marka ay soo baxayso:

- |          |            |
|----------|------------|
| a. Sagal | c. Mood    |
| b. Sugul | d. Saadaal |

1. Xoolaha la siiyo haweeneyda lala guursadey:

- |          |             |
|----------|-------------|
| a. Kaalo | c. Masayr   |
| b. Yarad | d. Masaytir |

2. Labka ugaadha ee intuu tamaryareeyo raxanta ka taga ee gooni joog noqda:

- |            |              |
|------------|--------------|
| a. Saleeli | c. Sagandaaq |
| b. Saryan  | d. Saalimo   |

3. Dhibaatada aloosan ee markaas kacsan waxaa la yiraahdaa:

- |            |          |
|------------|----------|
| a. Salal   | c. Sulub |
| b. Saraayo | d. Soof  |

4. Marka awrka luquntiisa iyo jeenyihiisa xadhig laysugu xiro, si aanu kicin inta la rarayo:

- |             |            |
|-------------|------------|
| a. Qarqarsi | c. Dabar   |
| b. Qoofal   | d. Hoggaan |

5. Maadayska "aqoon &amp; afgarad" waxa ay maansooyinkiisu ku qotomeen hogga:

- |            |              |
|------------|--------------|
| a. Saarka  | c. Geeraarka |
| b. Gabayga | d. Jiiftada  |

**T. Akhri jiiftadan, dabadeena ka warceli weydiimaha (4 dhibcood)**

1. Awowgay kuwii siray
2. Kuwii sulubka nagu ridey
3. Soofkiina naga dhacay
4. Nimankii sokeeyaha
5. Ka dhex ridey saraayaha

1. Waa kuwee kuwa awoowihii siray?

.....

.....



2. Muxuu uga jeedaa "sulubka"?

.....  
.....

3. Maxay dhaceen dadka uu ka cabanayaa?

.....  
.....

4. Waa maxay "saraayuhu"?

.....  
.....

**CUTUBKA 6AAD: AKHRISKA IYO KOBCINTA GARAADKA (14 DHIBCOOD)**

**B. Ka qor waxyeelada intarneetka, curis aan ka yarayn 10 sadar (10 dhibcood).  
Waxaa la qiimayn doonaa:**

**Farta: 2 dhibcood**

**Astooyinka 3 dhibcood**

**Isku xirnaanta 3 dhibcood**

**Erayada cufan 2 dhibcood**

.....  
.....  
.....  
.....  
.....  
.....  
.....  
.....  
.....  
.....  
.....  
.....



### T. Isku aaddi afmaldahanaha iyo weedha is leh (4 dhibcood F3)

(duurxul- sarbeeb- sillan sugan- shareere)

1. Dacartuba marbay malab dhashaa aad muudsataa dhabaqe \_\_\_\_\_
2. Waa dhabarka seedaha ku yaal sidigta Dhaameele \_\_\_\_\_
3. Af labadii buu yeedhay \_\_\_\_\_
4. Gammaankiinna badan Faytinow gobolba waa cayne \_\_\_\_\_

### CUTUBKA 7AAD: SAHANKA IYO AQOONBAARISTA (21 DHIBCOOD)

#### B. Erayadan mid walba ku aaddi macnihiisa (05 dhibcood)

(Lifaaq, halkudheg, warbixin sahan, tifqanyotir, dahsoonidda aqoonbaarista)

1. Hannaanka lugu ururiyo xog, si loo diyaariyo warbixin dhammaystiran.  
(\_\_\_\_\_)
2. War iyo wacaal tifatiran oo si qurux badan u soo koobaya aqoonbaaristii la sameeyey. (\_\_\_\_\_)
3. Qoraalka oo waxyaalaha khaldan laga saaro. (\_\_\_\_\_)
4. Waa in uu yahay mid xiiso leh, xog badanina ku jirto. (\_\_\_\_\_)
5. Waxyaalaha qormooyinka gadaal lagaga daro. (\_\_\_\_\_)

#### T. Akhri gabayga, kana warceli weydiimaha (04 dhibcood)

Tuducyadan waxa uu Xaaji Aadan kaga warramayaa dhibaatooyinka ka jira maxkamadihii xilligaas, wuxuuna yiri:

- 1) Marka aad maxkamadaha tagtaad tacajabaysaaye
- 2) Tamiinkeeda xaajada ninkii taabi kari waaya
- 3) Inkastuu xaq taabuda wadiyo marag cad oo taas ah
- 4) Ama uu xujada toosiyoo looyarku is tiilo
- 5) Gartu doodda kuma taagantee taagtu waa lacage
- 6) Iyana waa tabaalaha waqtiga taynu aragnaaye

1. Tuducee ayaa tilmaamaya in aan caddaymaha iyo maragga wax lagu xukumayn? (1dhibic)

.....

.....

2. Tудucee tilmaamaya in uu garta helayo ninkii laaluush bixiya oo keliyi? (1dhibic)

.....  
.....

3. Sharax erayadan:

a. taabi kari waaya: (1dhibic)

.....

b. tabaalaha waqtiga: (1dhibic)

.....

J. Sharax maahmaahdan saddexleyda ah (06 dhibcood)

Saddex lagama gar helo:

1. Cudur geeri og

.....

.....

2. Gaajo guri og

.....

.....

3. Gardarro garba og

.....

.....

X. Ka warceli weydiimahan (6 dhibcood)

1. Laba ka sheeg waxyeelada uu qaadku u geysto qofka cuna. (F3. 191)

.....

.....

2. Laba ka sheeg cudurrada uu sigaarku sababo. (F3. 194)

.....

.....

3. Xubintee ayaa ugu nugul ee sigaarku waxyeeleeyaa. (F3. 192)

.....

.....

Dhammaad